**Jamhuuriyadda Somaliland**
**Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda**

**Republic of Somaliland**
**Ministry of Finance Development**

## Xafiiska Wasiirka

**Ref: WHM/02/08-01/118/2022** **Date: 24/01/2022**

| | |
|---|---|
| Ku: Dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda | Rugahooda |
| Ku: Dhamaan Taliyayaasha ciidamada. | Rugahooda |
| Ku:Hanti-dhawraha guud ee Qaranka. | Hargeysa |
| Ku: Xisaabiyaha guud ee Dawladda | Hargeysa |
| Ku: Agaasimaha waaxda Miisaaniyadda iyo Qorshaynta | Hargeysa |
| Og: Dhamman Agaasimayaasha Wasaaradda H/Maaliyadda | Hargeysa |
| Og: Agaasimaha Guud e Wasaaradda H/Maaliyadda | Hargeysa |
| Og: Gudoomiyaha Baanka Dhexe | Hargeysa |
| Og: Gudoomiyaha Maxkamadda sare | Hargeysa |
| Og: Shirgudoonka Golaha Wakiilada | Hargeysa |
| Og: Shirgudoonka Golaha Guurtida | Hargeysa |
| Og: Madaxweyne ku xigeenka | Hargeysa |
| Og: Madaxweynaha JSL | Hargeysa |

**Ujeedo:Dhaqangelinta Miisaaniyadda 2022.**

Anaga oo fulinayna hawlaha aannu Wasaarad ahaan ugu xilsaaran-nahay Qaranka Somaliland hirgelintooda kuna dhaqmayna **Xeer Lr.71/2015** (farqadiisa 30aad), ee qeexaya masuuliyadda guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu u xilsaaran tahay, Xeerka Maamulka Maaliyadda ***75/2016*** (Xeer-nidaamiyaha Maamulka Maaliyadda Qaybta IV(3) ee Maamulka & Kantaroolka Maaliyadda Dawladda waxa lagama-maarmaan ah in aannu idiin soo gudbino dhaqangalka Xeerka lagu ansixiyey miisaaniyadda sanadka 2022-ka ee ***Go,aan Lr.GW/KF-02/922/2022)*** ee ka soo baxay Golaha Wakiilada iyo Wareegtadii Awoodda Madaxweynaha Lr. **JSL/XM/WM/222-807/012022**, taas oo lagu baahiyey dhaqangelinta miisaaniyadda sannadka 2022-ka.

Sidaa darteed, waxaanu halkan ku cadeynaynaa nidaamka loo raaci doono ku dhaqanka Miisaaniayadda sannadkan 2022-ka. Nidaamkan oo ka kooban 11 qodob, waana sidatan soo socota:



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

1- **Dakhliga:**

Dhammaan waaxaha dakhli soo saarka ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, Wasaaradaha iyo Hayadaha kale ee laga filayo inay dakhli soo xareeyaan, waxa lagu adkaynayaa inay ka hawlgalaan qiyaasta Dakhli ee loo qoondeeyey, taas oo ku xusan shaxda degaameynta ee ku buugga miisaaniyadda, idinka oo raacaya xeerarka Dakhliga Gudaha,kastamada, Siyaasadda Cashuuraha Somaliland, nidaam-xisaabeedka Dawladda iyo siyaasadda Dakhliga ee lagu tilmaamay Miisaaniyadda sanadkan 2022.

Waxa kale oo laga codsanayaa madaxda sare ee Hayadaha Dakhli ururinta inay xil-weyn iska saaraan dabagalka, soo xeraynta iyo ogaanshaha heerka hadba dakhligu marayo. Sidoo kale, waxa la idinku wargalinayaa cid kasta oo cashuur diid ah inaad ku dabaqdaan ganaaxyada sharcigu jideeyey ee ku cad xeerka dakhliga ***Lr.72/2016.***

**2- Kharashka:**

Kharashka Miisaaniyadda 2022-ku, waxa uu ku salaysnaan doonaa hadba inta uu yahay dakhliga rasmiga ah ee ina soo gala (actual revenue inflow), taas oo la idinku wargelin doon wareegto hadba siday xaaladdu tahay, seddexdii (3) biloodba mar iyada oo laga duulayo isku dheelitirka Dakhliga iyo Kharaska,lana dabaqayo Xeerar- maaliyadeedka dalka u dajisan.

**3- Qaabka isticmaalka Madax-xigeenada Kharashka.**

Si looga hor tago inay dhacdo in madax-xigeenada kharashaadka qaarkood laga saaro kharash aan ku munaasib ahayn ama aan ka bixi karayn, waxaa lagala xidhiidhi doonaa wixii faah-faahin looga baahdo Waaxda Miisaaniyadda iyo Qorsheynta ee wasaaradda horumarinta maaliyadda.

**4- Nidaamka Maaraynta Xogta Xisaabaadka dawladda (SLFMIS)**

Dhamaan Wasaaradaha iyo Hayadaha dawladda waxa lagu wargelinayaa inay si buuxda u dabaqaan nidaamka iswada ee maaraynta xogta xisaabaadka dawladda, taas oo qayb ka ah dib u habaynta aynu ku samaynayno nidaamkeena maaliyadeed ee dawladda, waxa xusid mudan in Wasaarad iyo Hay'ad kasta oo u baahan tababarro dheeraad ah oo ku saabsan nidaam-xisaabeedkan ay wasaaraddu ku tababari doono.

Dhinaca kale, waxa Waaxda Miisaaniyadda iyo Waaxda IT-ga ee Wasaaradda Maaliyadda, lagu war-galinayaa in ay dhammaan dawladaha Hoose iyo Hay'adaha madaxa-banana ee qeybta ka ah Xeerka Miisaaniyadda 2022-ka, ay ku tababaraan, kuna fuliyaan sidii ay Miisaniyadahooda ugu dhex fulin lahaayeen Nidaamka Maareynta Maaliyadda ee SLFMIS-ka.



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## 5- Kharaska kala wareejinta Miisaaniyadda (Budget virement).

sida uu tilmaamayo qodobka ***6aad*** xarafkiisa B ee xeer-nidaamiyaha xisaabaadka dawladda Kkarashka kala wareejinta madax-xigayaasha waxay ka bilaabmi doonaan ***1-da July ilaa 30-ka November*** *wixii aan ahayn xaalad gaar ah (force-majeure)*, Waxana awoodda kala wareeinta leh Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.

## 6- Kharashyada kala wareejinta.

Mada-xigayaasha kala wareejintooda waxaa loo raacayaa sida ay isku cutub u yihiin ama ay isu dabaqaan (category), Waxa kale oo iyana reeban in hal Madax-xige mar wax laga wareejiyo marna lagu wareejiyo iyo in Iibsiga hantida raagta iyo mashaariicda horumarineed loo wareejiyo madax-xigayaal aan ahayn sifihii loo qoondeeyey taasoo baal marsan nidaam-xisaabeedka maaliyadda, sidoo kale lacag loo qoondeeyey mushahar & gunno lagama dhigi kharash, madaxige aan ku jirin buugga miisaaniyaddana laguma wareejin karo wax lacag ah ilaa uu goluhu soo ogolaado mada-xigahaas.

## 7- Mashaariicda ku jirta Miisaaniyadda 2022-ka.

Waxa jirta inay caado noqotay in kharashka mashaariicda loo qoondeeyey inay Wasaaradaha ama Hay'aduhu soo codsadaan in loo sii daayo iyagoon u samayn wax qorshe ah mashruucaas, sidaas darteed waxa la idinku wargelinayaa inaan kharashkaas la sii deyn doonin ilaa aad soo gudbisaan qorshayaasha mashraariicdaas iyo kharashkooda oo aad soo jejebiseen (budget breakdown), waana in loo kala saaro kharashka tooska ah ee fulinta mashruuca la xidhiidha (Development/capital expenditure) iyo kharashka kubaxa adeegga iyo shaqaalaha ***(Recurrent expenditure)***. Waxaa kale oo lagama maar-maan ah in:

- Madax-xigayaasha lacagta ku jirtaa ka kooban tahay dhismayaal, Gaadiid, Qalab iyo mashaariic kaleba waxaa faahfaahintooda lagala xidhiidhi doonaa waaxda Miisaaniyadda iyo Qorsheynta ee Wasaaradda H.Maaliyadda;
- Wasaaradaha leh dhismayaal, Hantida raagta iyo Mashaariic waxa la farayaa inay u sameeyaan cid ka mas'uul ah Warbixintooda Maamul iyo Lacageed (Focal Person);

Sidoo kale, Wasaaradaha iyo Hay'adaha isticmaala Madaxigayaashan hoos ku xusan waa inay soo gudbiyaan faah-faahinta isticmaalkooda sadex bilood walba:

- Kharashka Sanduuqa aqoonsi-raadinta
- Kharashka safaaradaha dibedda
- Barnaamujyada Tv-ga iyo Idaacada
- Kharashka dib u habeynta shuruucda



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

- Sanduuqa ka hortagga COVID-19 & horumarinta caafimaadka

## 8- Tilmaamayaasha kale ee Miisaaniyadda:

I. Waxa ka reeban Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda in la galo karash dheeraad ah oo ka baxsan ku talogelka miisaaniyadooda,

II. Waa inaan isticmaalka kharashyada lagu koobin magaalo-madaxda oo keliya balse lagu fidiyo, laguna baahiyo dhammaan xafiisyada Gobolada & Degmooyinka dalka, iyadaoo la raacayo habka Waaranada kharashka, si loo yareeyo cabashooyinka ka yimaada Gobolada & Degmooyinka, waana in Waaranka dhabarkiisa lagu muujiyo faahfaahinta kharashkaas;

III. In awoodda kharash (Sub-warrant) ay gadhaan dhammaan Gobolada & Degmooyinka, sedex bilood walba bisha u horaysa, una soo diraan xisaab-celinta xaruntooda maamul ka hor inta aanay soo dalban saddex biloodka xiga;

IV. Waa in Wasaaradaha & Hay'aduha Dawladdu saddex bilookiiba hal mar u soo gudbiyaan xisaab-celintooda kharash Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, gaar ahaanna Waaxda Miisaaniyadda iyo Xisaabaadka guud, sidaas darteed waxa la idinku wargelinayaa in ciddii keeni weyda xisaab-celintaas in aan loo sii deyn doonin Awoodahooda kharash ee saddex-biloodlaha ka dambeeya;

V. Cid kasta oo lacag gacan-ku hayn ah (impress) qaadatay,waa inay ku soo xerayso Khasnadda Dawladda lacagta ay qaateen inta ka horaysa 31-ka December, waxaana la idin ogaysiinayaa in ciddii aan soo xerayn lacag hore oo horumarin ah( impress) aan loo ogolaan doonin lacag dambe oo horumarin ah, ayadoo laga hakin doono isticmaalka kharash miisaaniyadeed-kooda waafaqsan horumarintaas;

VI. Agaasimaha waaxda Miisaaniyadda & Xisaabiyaha Guud waxa lagu wargelinayaa in Waarannada kharash ee soo gaadha ay xafiisyadooda ay waajibaadkooda ka gutaan sida ugu dhakhsaha badan, dabagalka hawlaha la xidhiidha Awoodaha Kharash waxa ka masuul ah Waaxda Miisaaniyadda & Qorsheynta ee W.H.Maaliyadda.

VII. Wasaaradda Hawlaha Guud ayaa ka masuul ah wixii dhisme ah ee qaranka loo dhisayo. Sidaas daarteed, wasaarad iyo Hay'ad kasta oo leh kharash dhisme waxay warqad xaqiijin ah oo ku saabsan nashqadda la raacayo, tilmaamaha tayada la rabo iyo qiimahaba ka soo qaadanaysaa Wasaaradda Hawlaha Guud;

VIII. Wasaaradda ama hay'adda loo dhisayo dhisme waa inay wasaraadda hawalaha guud ka codsadaan nashqada iyo qiimaynta hadba halkuu marayo dhismuhu iyadoo loo eegayo lacagta ku jirta miisaaniyadda, isla markaana wasaaradda/hayadda loo fulinayo dhisme waa inay heshiis la gashaa qanadaraas-laha fulinaya dhismaha kaas oo tilmaamaya waajibaadka laga rabo dhinac kasta;



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

IX. Gudida qandaraasyada waxaa lagu wargalinyaa inaanay bixin qandaraas aan lacagtiisu ku jirin miisaaniayaddda dawladda isla markaana nooca qandaraas ee ay bixinayaan uu lahaado tilmaamo iyo shuruudo cad oo qeexaya sifaha qanadaraaska la bixinayo laga doonayo;kaas oo waafaqsan Qoondadda Miisaaniyadda ugu jirta.

X. Wasaaradaha iyo Hay,adaha dawladdu lama macaamili karaan ganacsade aan sidan warqadda cashuur la`aanta ***(Tax Clearance Certificate),*** ee ka soo baxda Waaxda cashuuraha Beriga ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda;

XI. Wasaaradaha iyo Hay'adaha dawladda Waxa ka reeban qaadida wax dakhli ah oo aan sharcigu jideyn, Wasaaradda maaliyadda ayaana Qaranka uga mas'uula qabashada dakhliga.

## 9. **Hantida Dawladda**:

Hanti kasta oo qaran, ha noqoto mid guurto ama maguurto ah waa in ay lahaataa Diiwaanada kala duwan ee sharcigu qeexayo iyo qiimo lacageed, kuna sugnaataa xanaanayn iyo daryeel fiican sida ku cad qodobka 21aad ee Xeerka maamulka maaliyadda. waxaana arintaas wadashaqaynteeda leh Wasaaradda Hawlaha guud iyo Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.

## *10. Gaadhsiinta kharashaadka Hawl socodsiinta Gobolada*

Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda oo ku duulaysa kormeer ay ku soo mareen dhamaan Gobolada dalka ayaa waxa ugu soo baxday in badi Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dowladda ee Xafiisyada ku leh Gobolada dalka aanay u dirin kharash hawl socodsiineed oo ay kaga shaqeeyaan Xafiisyada.

Si hadaba adeega dawladu u noqdo mid waxtar leh oo wada gaadha dhamaan Gobolda dalka, isla markaana aanay fadhiid u noqon Xafiisyada Goboladu, waxa Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dowladda lagu wargalinayaa inay Miisaaniyadda daadejiyaan oo Xafiisyadooda Gobolada u diraan kharashkaadka lagama maar-maanka u ah hawl-socodsiintooda.

Xisaabiyaha Guud waxaa lagu wargelinayaa in uu la socdo dhamaan xafiisyada gobolada sida wasaaradaha iyo hay,adaha dawladdu ugu gudbiyaan kharashaadkooda 3 billodlaha ah, kana soo war-bixiyo wasaaradaha aan u dirin gobolada kharashka hawl-socodsiinta bisha ugu horraysa.

## *11. Kordhinta 30% Mushaharka Ciidamada.*

Waxa **30%** loo kordhiyay Mushaharka Asalka ah ***(Basic Salary)*** dhamaan Ciidamada kala duwan ee qaran Miisaaniyadda 2022, taas oo Mushaharka Askarigu noqonayo ***1,170,166 SLSH***



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Sidaa awgeed, waxa dhamaan Ciidamada kale duwan lagu wargalinayaa laga bilaabo ***Jan 2022*** inay mushaharka ku soo dalbadaan qadarka sare ku xusan.

12.**Heerka Qasnadda.**

Si la isugu dheeli tiro kharashka baxaya (outflow) iyo dakhliga soo xerooda (inflow) waxa Xisaabiyaha guud lagu War-galinyaa in bil kasta uu Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda u soo gudbiyo Heerka Qasnaddu marayso, si looga shidaal qaato, looguna hago ogolaanshaha Awoodaha kharash-miisaaniyadeed-ka (Expenditure warrant) ee soo maraya Waaxda Miisaaniyadda.

Wasaarad iyo Hay`ad kasta oo dakhli soo saar, oo odoroska Miisaaniyadana ku jirta, waxa lagu wargelinayaa in dakhli soo xeroontooda lagula xisaabtami-doono, Kharashyada ay soo codsadaana laga xanibi doono haddii la ogaado dakhli ay qabteen oo aanay soo xerayn.

13-**Lacag-celinta (Refund of Revenue).**

Dakhli kasta oo ku xerooday qasnadda dawladda dhexe oo dheeraad ah ama sharcigu u jideeyey cid gaar ah u celintiisa waxa la raaci doonaa sidan hoos ku xusan:

I. Haddii lacagtaas la qabtay sannad maaliyadeedka socda gudihiisa, waxa lacagta toos u celinaya Xisaabiyaha guud, marka uu hubiyo in lacagtaasi ku xerootay qasnadda dawladda, isla markaana uu helo ogolaanshaha lacag celinta ee Agaasimaha Guud ee Wasaaradda H.Maaliyadda.

II. Nuqulka rasmiga ah (Original receipt) ee lacagtiisa la celinayo, waa in wajigiisa lagu qoraa "Waa la celiyey", laguna muujiyo Xaashida lacagcelint (Payment voucher or Debit Memo) lambarkeeda.

III. Lacagcelin lama sameyn karo haddii uu maqan yahay (Original receipt.) ama nuqulkaa laga soo caddeeyey meeshii laga jaray (true copy);

IV. Haddii lacag-celintu la xidhiidho sanadihii hore, waxa lacataas celintayda lagu ogolaan doonaa Awood kharash (Expenditure warrant) ah sannadka socda.



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

**Gabagabo.**

Mudanayaal, in kasta oo daqaalaha dalku aanu ahayn mid xooggan, maadaama aanu jirin wax soo saar badan oo dalku dhoofiyo, hadana dhaqaalaheenu waa mid marba marka ka dambeeya soo xoogaysanaya, waxaanuna gebagabadii idinla socod-siinayaa in yoolka Wasaaradani yahay in Miisaaniyadda sannadkan 2022-ka ay si dhab ah u hirgasho, anagoo ku rajo weyn inaad dhinaciinana wax nagala qaban doontaan wixii dakhli soo xarayn ah ee idin ku xidhan, Sidaa Darteed waxay Misaaniyadan qorshaheeda dhaqangalku ka bilaabmayaa ***01.01.2022.***

***Allaa Mahad leh***

JAMHUURIYADDA SOMALILAND
WASIIRKA
WASAARADDA HORUMARINTA MAALIYADDA

**(Dr. Sacad Cali Shire)**

**Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda**